



# Tallaalada xoojiyeyaasha ahi waxaa loogu talo geley illaa carruurta da'doodu tahay 5-11

Ogoosto 26, 2022 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Reer Alberta waxa ay dhawaan bilaabi karaan balansiga tallaalada xoojiyeyaasha ah ee tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay carruurta da'doodu tahay shan illaa 11, taas oo lagu salaynayo talooyinka laga helay Guddida Latalinta Qaran ee Tallaalka iyo Guddida Latalinta Alberta ee Tallaalka.

Balansashada waxaa la furi doonaa Ogoosto 29 ee tallaalada xoojiyeyaasha ahna waxa bixintooda la bilaabi doonaa Ogoosto 31.

Health Canada waxa ay ansixisay u adeegsiga tallaalka Pfizer (Comirnaty) tallaalada xoojiyeyaasha ah ee carruurta da'doodu tahay shan illaa 11 Ogoosto 19. Kani waa tallaalkii COVID-19 ee ugu horreeyey ee lagu ansixiyey Canada in uu u noqdo tallaalka xoojin kooxda da'dan ah. Carruurta difaaca jidhkoodu liito horeba waxa ay ugu qalmaan taxanaha koowaad ee saddexda tallaalka ah, markaa tallaaladooda xoojintu waxa uu noqon doonaa tallaalka afraad.

Waalidiinta iyo masuullada waxa lagu dhiirrigelinayaa inay raadsadaan macluumaad la isku halleyn karo oo dhab ah si go'aankooda tallaalka ay uga dhigaan mid macluumaad ku salaysan isla markaana ugala hadlaan khataraha iyo faa'iidooyinka bixiyaha daryeelkooda caafimaad kahor inta aanay carruurtooda tallaalin.

## Balansiga ballanta tallaalka COVID-19 carruurta da'doodu tahay shan illaa 11

Ballamaha tallaalada xoojiyeyaasha ah waa in lagu balansadaa Nidaamka Buuqingareynta Tallaalka ee Alberta "Alberta Vaccine Booking System" ee barta [alberta.ca/vaccine](https://alberta.ca/vaccine) ama adiga oo ka wacaya Health Link lambarka 811. Farmasiiyada qaar waxa ay diyaarin karaan booqashooyinka billaa ballanta ah.

Carruurta da'doodu tahay shan illaa 11 sano ee ku nool bulshooyinka First Nations waxa ay galaangal u heli karaan tallaal xoojin ah iyaga oo u maraya xarumaha caafimaadka dadweynaha ama xarumaha kalkaalinta caafimaad.

## Xaqiiqoyin dhakhso ah

- Kooxda da'dan ah, qiyaasaha wax ku oolnimada tallaalka ee taxanayaasha koowaad ee ka dhanka ah caabuqa doorsoomaha Omicron ee calaamadaha leh waxa uu u dhexeeyaa 30 illaa 50 boqolkiiba. Qiyaasaha wax ku oolnimada tallaalka ee ka dhanka ah xanuunka daran ee ay ku jirto isbitaal dhigistu ee uu keeno Omicron waxa uu u dhexeeyaa 41 boqolkiiba illaa 68 boqolkiiba.
- Natijoooyinka tijaabooyinka caafimaad waxa ay muujiyaan in tallaalka xoojinta ah ee Comirnaty ay si fiican u xammilaan carruurta ah da'da shan illaa 11 sano isla markaana si laxaad leh u kordhiyeen heerka antibodhiyada difaaca ah ee kuwa qaatay. Saamaynaha taban waxa ay caadi ahaan ahaayeen kuwo khafiif ah ama dhexdhexaad ah waxaana ay ku baaba'een muddo dhawr maalmood ah gudahood.
- Tallaal ku wada qaadashada Alberta:
  - 51 boqolkiiba kamid ah carruurta da'doodu tahay shan illaa 11 waxa ay ku qaateen ugu yaraan hal tallaal oo tallaalka COVID-19 ah Alberta.
  - Tirakoobyada COVID-19 ee Alberta [waxa lagu heli karaa onlayn ahaan](#).

## Macluumaadka la xidhiidha

- [Macluumaadka diiwaanada iyo tallaalada COVID-19](#)
- [Macluumaad balansashada tallaalka ee AHS](#)